# Awoodaha Muhiimka ah

*ee Daryeelka Barbaarinta iyo Xirfadlayaasha Waxbarashada*



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES





# Tusmada Buugga


Mahadcelin . . . . . . 2

Xubnaha Dallada Horumarinta Xirfadlayaasha: . . . . . . 3

Awoodaha Muhiimka ah: Dulmarka Guud. . . . . . 4

Qeybta Tusmada I: Koritaanka Caruurta iyo Horumarka. . . . . . 8

Qeybta Tusmada II: Manhajka iyo Barashada Deegaanka . . . . . . 10

Qeybta Tusmada III: Cabirka Socda ee Horumarka Canuga . . . . . . 25

Qeybta Tusmada IV: Shuraakada Qoyska iyo Bulshada . . . . . . 27

Qeybta Tusmada V: Caafimaadka, Badqabka iyo Nafaqada . . . . . . 30

Qeybta Tusmada VI: Macaamillada. . . . . . 34

Qeybta Tusmada VII: Qorsheynta iyo Hormarinta Barnaamijka . . . . . . 37

Qeybta Tusmada VIII: Horumarinta Xirfada iyo Hogaaminta. . . . . . 40

Eray-bixinta . . . . . . 43

Tixraacyada . . . . . . 47



## Mahadcelin

Qabyo-qoraalka Awoodaha Muhiimka waxa diyaariyey Cynthia Juarez iyo Lexi Catlin ee Adeega Waxbarashada Degmada 105.

Waxaa dib-u-eegay oo tafatiray Kooxda-Shaqada Heerarka Xirfadlayaasha ee Dallada Horumarinta Xirfadlayaasha Gobolka Washington (PDC) iyo ururka ZERO TO THREE (DHALASHADA ILAA SADDEX SANO JIR), Xarunta Qaranka ee Caruurta, Socod-Baradka iyo Qoysaska.

Dhukumentigani wuxuu kasoo qaadanayaa qaab-dhismeedkiisa Awoodaha Muhiimka ah ee Kansas iyo Missouri ee Xirfadlayaasha Daryeelka Barbaarinta iyo Waxbarashada.

**Department of Children, Youth & Families (Waaxda Carruurta, Dhalinyarada & Qoysaska, DCYF) ee Gobolka Washington**

**Bayaanka Himilada:**

*Ilaali caruurta oo xooji qoysaska si ay u badhaadhaan.*

Maalgalinta sameynta Awoodaha Muhiimka ah ee Xirfladlayaasha Daryeelka Barbaarinta iyo Waxbarashada ee Gobolka Washington waxa ay katimid Xeerka Sookabashada iyo Dibu-Maalgashiga Mareykanka ee 2009 (ARRA).

*Wixi macluumaad dheeraad ah oo khuseeya horumarinta xirfada Washington, booqo* **www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-profdev**.

## Xubnaha Dallada Horumarinta Xirfadlayaasha:

**SUSAN YANG AFFOLTER**
*Khayraadka Daryeelka Caruurta iyo Shabakada Gudbinta ee Gobolka Washington*

**MICHELLE ANDREAS**
*Golaha Gobolka ee Bulshada iyo Kuleejka Farsamada*

**TENLEE BELL**
*Ururka Waxbarashada Caruurta Yaryar ee Washington*

**BRENDA BOYD**
*Jaamacada Gobolka Washington*

**KELLI BOHANON**
*DCYF, oo waagi hore ahayd Washington State Department of Early Learning/Office of Superintendent of Public Instruction (Waaxda Waxbarashada Barbaarinta ee Gobolka Washington/Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha)*

**MOLLY BOYAJIAN**
*Thrive by Five Washington (Kobcidda Ubadka Ilaa Da'da Shan Sano ee Washington)*

**AGDA BURCHARD**
*Ururka Waxbarashada Caruurta Yaryar ee Washington*

**LEXI CATLIN**
*Adeega Waxbarashada Degmada 105*

**ANNETTE DIEKER**
*Madaxa Bilowga*

**KIM FERGUSON**
*Adeegyada Qoyska iyo Caruurta Katooliga ah*

**MARY FISHER**
*Dugsiga Degmada Bethel*

**SANGREE FROELICHER**
*Thrive by Five Washington (Kobcidda Ubadka Ilaa Da'da Shan Sano ee Washington)*

**SHERYL GARRISON**
*Child Care Action Council (Golaha Waxqabadka Daryeelka Caruurta)*

**NANCY GERBER**
*SEIU, Maxaliya 925*

**DOROTHY GIBSON**
*Midowga Macalimiinta Mareykanka*

**LAURA GIDDINGS**
*Khayraadka Daryeelka Caruurta iyo Shabakada Gudbinta ee Gobolka Washington*

**CHAR GOODREAU**
*DCYF, oo waagi hore ahayd Washington State Department of Early Learning (Waaxda Waxbarashada Barbaarinta ee Gobolka Washington)*

**LORRIE GREVSTAD**
*Department of Health (Waaxda Caafimaadka)*

**AMBER HAVENS**
*Shuraakada Tababarka Waxbarashada/Golaha Latalinta Waxbarashada Barbaarinta*

**KAREN HEALY**
*DCYF, oo waagi hore ahayd Washington State Department of Early Learning/Early Childhood Education and Assistance Program (Waaxda Waxbarashada Barbaarinta ee Gobolka Washington/Barnaamijka Waxbarashada Barbaarinta Caruurta iyo Caawimada)*

**REBECCA HEINRICH**
*Department of Health (Waaxda Caafimaadka)*

**KURSTEN HOLABIRD**
*SEIU, Maxaliya 925*

**SALLY HOLLOWAY**
*Kuleejka Bulshada ee Whatcom*

**DONNA HORNE**
*Ururka Daryeelka Caruurta Qoyska ee Gobolka Washington/ Mutadawiciinta Mareykanka*

**JACKIE JAINGA HYLLSETH**
*Fasaxa Dugsiyada Washington*

**NANCY HUTCHINS**
*Madaxa Bilowga Gobolka X*

**CYNTHIA JUAREZ**
*Adeega Waxbarashada Degmada 105*

**JANICE KELLY**
*Office of Superintendent of Public Instruction (Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha)*

**RACHEL KIM**
*Thrive by Five Washington (Kobcidda Ubadka Ilaa Da'da Shan Sano ee Washington)*

**HANNAH LIDMAN**
*Horyaalka Codeeyayaasha Waxbarashada*

**KARRI LIVINGSTON**
*DCYF, oo waagi hore ahayd Washington State Department of Early Learning (Waaxda Waxbarashada Barbaarinta ee Gobolka Washington)*

**RETTA MAIN**
*Jaamacada City*

**LINDA TYLER MURRAY**
*Midowga Macalimiinta Mareykanka*

**MARI OFFENBECHER**
*Fasaxa Dugsiyada Washington*

**JOEL RYAN**
*Gobolk Washington Ururka Madaxa Bilowga iyo ECEAP*

**MARY JO SHANNON**
*Barayaasha Waxbarashada Barbaarinta/Midowga Macalimiinta Mareykanka ee Washington*

**KIRSTEN SPENCER**
*Xaafada Caruurta*

**ELIZABETH BONBRIGHT THOMPSON**
*Khayraadka Daryeelka Caruurta & Shabakada Gudbinta ee Gobolka Washington*

**KATY WARREN**
*Gobolk Washington Ururka Madaxa Bilowga iyo ECEAP*

**ERICA WATSON**
*Iniinta Daryeelka Nolosha Caruurta*

**JIM WEST**
*Guddiga Isku-Xidhka Waxbarashada Sare*

**SUE WINN**
*Ururka Daryeelka Caruurta Qoyska ee Gobolka Washington/ Golaha Latalinta Waxbarashada Barbaarinta*

# Awoodaha Muhiimka ah: Dulmarka Guud

*Sanadkii 2009, Sharci-dejintu waxay amartay DCYF, oo waagi hore ahayd Washington State Department of Early Learning (Waaxda Waxbarashada Barbaarinta ee Gobolka Washington, DEL) inay dejiso awoodaha ugu muhiimsan ee xirfadlayaasha daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada. Khayraadkani wuxuu sharxayaa waxa xirfadlayaashani u baahan yihiin si ay u ogaadaan una awoodaan inay sameeyaan si ay u siiyaan daryeel tayo sare leh caruurta.*

## Awoodaha muhiimka waa daruuri waayo waxay:

- Sharxayaan waxa xirfadlayaasha daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada u baahan yihiin oo ay awoodaan si ay daryeel iyo waxbarasho tayo sare leh u siiyaan caruurta.
- U adeegayaan asaaska go'aamada iyo dhaqamada ay xirfadlayaasha ka fuliyeen dhammaan goobaha daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada.
- Dejiyanayaan heerarka daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada caawinaysa xirfada aqoonta.
- Waa qeyb muhiima oo ka mida nidaamka horumarinta xirfadaha balaadhan.

## QAABABKA KALA DUWAN EE AWOODAHA MUHIIMKA AH EE LA ISTICMAALI KARO:

| | |
|---|---|
| **Daryeel-bixiyayaasha/ Macalimiinta** | • Qiimee heerka aqoonta iyo xirfada ee sideed qeybood oo nuxurka kujira.<br>• Aqoonso qeybaha gaarka ah ee u baahan horumarinta xirfada (tusaale, tababar/waxbarasho). |
| **Agaasimayaasha, Barnaamijka** | • Cadee shuruudaha horumarinta xirfada (tusaale, tababar/waxbarasho) ee macluumaadka shaqada shaqaalaha Maamulka.<br>• Diyaari qorshayaasha iyo siyaasadaha horumarinta xirfada shaqaalaha (tusaale, tababar/waxbarasho).<br>• Deji cabir mushahar ku saleysan heerarka awooda. |
| **Tababarayaasha, Tababarka iyo Haayadaha** | • Qorshee oo nidaami horumarinta xirfada (tusaale, tababarka/ waxbarashada).<br>• Kor uqaad horumarinta fursadaha xirfada (tusaal, tababarka/waxbarashada). |
| **Kuliyada Waxbarashada Sare, iyo Maamulka** | • Isku xidh oo nashqadee waxyaabaha uu ka kooban yahay koorasku si aad u fudaydiso iskubadalka iyo waadixinta heshiisyada Shaqaalaha.<br>• Qiimee waxyaabaha uu hadda ka koobanyahay barnaamijku si loo go'aamiyo horumarinta kooraska. |
| **Haayadaha Fadaraalka, Gobolka, iyo kuwa Maxaliga ah** | • Horumari oo hirgali barnaamijyada kuwaasoo kor u qaadaya xirfada qaybta daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada. |

## Awoodaha Muhiimka ah ee Gobolka Washington ee Daryeelka Barbaarinta iyo Xirfadaha Waxbarashada waxaa nidaamiya meelaha ay ka koobanyihiin iyo heerarka

### Meelaha ay ka koobanyihiin

Meelaha ay awooda ku leeyihiin waxay kaa waafaqsan tahay meelaha caadiga ah ee la islayaqaan ee daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada, waxayna wax ka qabanaysaa horumarinta iyo waxbarashada dhowr meelood oo xirfadlayaasha ah. Meel kasta oo ay ka koobantahay waxay qeexaysaa aqoonta iyo xirfadaha xirfadlayaashu u baahan yihiin inay kala shaqeeyaan caruurta dhalashada ilaa 8 iyo qoysaskooda. Xirfadlayaashu waxay kordhinayaan aqoontooda oo xirfadaha kujiraana waa meelaha loo marayo tababarada/waxbarashada socda.

Marka ay ku haboontahay, meelaha kujira waxay cayimayaan xirfadee baa si guud ugu jirta caruurta ka kala yimid dhaqano kala duwan, jinsiyado kala duwan, luuqado kala duwan iyo taariikho dhaqaale oo kala duwan. Waxyaabaha ay ka koobantahay sidoo kale waxay wax kaqabanayaan caruurta baahiyaha gaarka ah qabta ee kujirta daryeelka barbaarinta iyo goobaha waxbarashada. Awoodaha gaarka ah ee xirfadlayaasha la shaqaynaya caruurta yar-yar iyo kuwa socod baradka ah waxa lagu xusay mid kasta halka ay kaga jirto. Awoodahan gaarka ah ee caruurta yar-yar waxa lagu calaamadiyay calaamada (*).

Xirfadlayaasha la shaqaynaya caruurta yar-yar iyo kuwa socod baradka ah waa inay wax kaqabtaan awoodaha ku calaamadsan oo dhamaan awoodaha ku xusan meesha si loo hubiyo in macluumaadka muhiimka ah iyo xirfadaha aanan laga reebin. Sidoo kale, xirfadlayaasha la shaqeeya carruurta waaweyn waa inay ogaadaan awooda xirfadlayaasha caruurta yar-yar iyo socod baradka, maadaama ay ka caawin karto inay fahmaan horumarka cunuga oo ay ka caawiyaan la shaqaynta carruurta laga yaabo inay koriimadoodu dib u dhacdo.

I **Koritaanka Cunuga iyo Barbaarinta:** fahamka sida caruurtu ay ku helayaan luuqad iyo sharaxaado hal abuur leh si ay u koraan jidh ahaan, garasho ahaan iyo bulsho ahaanba.

II **Manhajka iyo Deegaanka Waxbarashada:** samee deegaan kaasoo siinaya khibrad waxbarasho si loo buuxiyo baahida caruurta, awoodaha iyo doonista.

III **Cabirka Socda ee Horumarka Canuga:** lasoco oo qiimee waxa caruurtu garanayso iyo waxa la samayn karo si loo qorsheeyo oo loosiiyo manhaj kaasoo buuxiya koritaankooda iyo baahiyahooda waxbarasho.

IV **Wadashaqeynta Qoyska iyo Bulshada:** lasamee xidhiidh adag qoysaska iyo haayadaha/ ururada aad wadashaqaynta leedihiin si loo buuxiyo baahiyaha caruurta iyo si loogu dhiirigaliyo ku luglahaanshaha bulshada ee daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada.


V **Caafimaadka, Badqabka, iyo Nafaqaynta:** samee oo joogtee deegaan ilaalinaya badqabka, caafimaadka iyo nafaqaynta caruurta.

VI **Isdhexgalka:** samee xidhiidh taageero oo caruurta ah oo u tilmaam shaqsi ahaan inuu qayb ka yahay kooxda.

VII **Qorsheynta iyo Hormarinta Barnaamijka:** samee, hirgali, qiimee oo falanqee daryeelka barbaarinta iyo goobaha waxbarasho.

VIII **Horumarinta Xirfada iyo Hogaaminta:** ugu adeeg caruurta iyo qoysaska hab xirfad ku dheehantahay oo kaqaybqaado bulshada adigoo matalaya daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada.

Awoodaha muhiimka ah waa qaab aqooneed iyo xirfado oo ilaa shan heer oo diyaarinta xirfada ah; sikastaba ha ahaatee, ma aha kuwo wax walba ay kujiraan. Awoodaha qaar waxay ka turjumayaan meelaha ay ka koobantahay ee ay u baahanyihiin daryeel bixiyaasha iyo macalimiinta si ay u qabtaan talaabooyin gaar ah, halka kuwa kale ay soo jeedinayaan meelaha koritaanada socda iyo aqoonta. Daryeel bixiyaasha iyo macaclimiinta waxay raadin karaan ku qanacsanaanta awoodaha qaar inay u baahantahay tababaro/waxbarasho dheeraad ah.



## Heerarka

Heerarka awoodu waxay ka bilaabmataa xirfado asaasi ah si loo galo qaybta oo loo gaadho heer sare oo diyaarin aqooneed ah iyo khibrado kala duwan. Horumarka daryeel bixiyaasha/macalimiinta ee ka gudbaya hal heer una gudbaya mid kale iyagoo qaadanaya waxbarasho toos ah iyo/ama aan toos ahayn iyo natiijada ku celcelinta. Daryeel bixiyaasha iyo macalimiinta waxay yeelan karaan xirfado heerar kala duwan ah oo meelo kala duwan khuseeya iyadoo ku xidhan doorka, goobta iyo khibrada.

Shanta heer waa kuwo layskusoo ururiyay. Tusaale ahaan, daryeel bixiye/macallin ka shaqeeya Heerka 3 waxa uu leeyahay aqoon iyo xirfado uu ku buuxiyo aqoonta Heerarka 1, 2, iyo 3. Dhamaan heerarka, daryeel bixiyeyaasha/macalimiinta daryeela oo wax baraya carruurta yar-yar waxay sii wadaan ka qaybqaadashadooda waxqabadyada horumarinta xirfadeed oo ay kordhiyaan aqoontooda iyo xirfadahooda mid kasta oo ka mid ah meelaha uu ka koobanyahay. Daryeel bixiyaasha iyo macalimiinta kuwaaso gaadha Heerka 5 waxa lagu dhiirigalinayaa inay sii wadaan horumarintooda iyo kobcintooda xirfadaha.

**Heerka 1** waxay dajinaysaa asaaska daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada oo waxa kujira aqoonta asaasiga ah iyo xirfadaha laga rajaynayo xirfadlaha ku cusub goobta daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada, ama xirfadlaha kujira goobta laakiin fursad yar u helay inuu qaato casharo, tababaro ama waxbarasho gaar ah.

**Heerka 2** waxa kujira heerka 1 oo lagu daray aqoonta iyo xirfadaha marka la bar-bardhigo xogta Child Development Associate (Aqoonta Barbaarinta Cunuga), oo ah shahaadada barbaarinta cunuga, ama tababarka/waxbarashada.

**Heerka 3** waxa kujira heerarka 1 iyo 2 oo lagu daray aqoonta iyo xirfadaha u dhigma shahaadada kahoosaysa heerka koowaad ee early childhood education (waxbarashada barbaarinta caruurta) ama koriinka cunuga.

**Heerka 4** waxa kujira heerarka 1, 2 iyo 3 oo lagu daray aqoonta iyo xirfadaha u dhigma shahaadada heerka koowaad ee early childhood education (waxbarashada barbaarinta caruurta) ama koriinka cunuga.

**Heerka 5** waxa kujira heerarka 1, 2, 3 iyo 4 oo lagu daray aqoonta iyo xirfadaha u dhigma shahaadada sare ee heerka koowaad ee early childhood education (waxbarashada barbaarinta caruurta) ama horumarinta cunuga.

Daryeelka barbaarinta iyo xirfadaha aqoontu waxay noqon karaan kuwo si gaar ah u kordhaya iyagoo gaadhaya heerar sare oo waxbarashada caadiga ah. Xirfadahan waa inay muujiyaan qaybo awoodo guud oo meelo cayiman ah oo gaar ahaan takhasuska. Intaa waxa dheer, xirfadahani waa in laga rajeeyo door hogaamineed marka lajoogo goobta, lashaqaynta xirfadlayaasha kale si kor loogu qaado wacyigalinta ku saabsan muhiimada daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada.

Kala duwananshaha dhaqanka oo ay kujiraan haybta, luuqada iyo heerka halka u kasoo jeedo ee dhaqan dhaqaale kuwaasoo saameeya goobaha waxqabadka ee daryeelka barbaarinta iyo waxbarshada. Xirfadlayaashu waxay aqoonsanayaan in qoys kasta uu leeyahay qaab dhismeed, qiyam, waxyaabo uu rumaysan yahay, caadooyin iyo isdhexgal u gaar ah.



*Awoodaha Muhiimka ah ee Gobolka Washington ee Daryeelka Barbarinta iyo Xirfadlyaasha Waxbarasho* waxay ku salaysan yihiin cilmi baadhista koritaanka caruurta ee hadda iyo dhismayaashan:

- Caruurtu waxay u baahan yihiin taageero iyo deegaan dabiici ah kaasoo ay ku koraan, wax kubartaan, oo ku kobcaan.
- Daryeel bixiyaasha iyo macalimiinta waxay aqoonsadaan in caruurtaas markii hore ay wax soo bareen qoysku. Marka ay sidaas samaynayaan, daryeel bixiyeyaasha iyo macalimiintu waxay horumariyaan xidhiidh adag oo ay la yeeshaan qoysaska waxayna taageeraan awoodooda.

Xirfadlayaashu waxay ixtiraamaan qiimaha qoys kasta waxayna qadariyaan hodannimada kala duwanaanta ee qoys kastaa la yimaado goobta daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada.

- Xirfadlayaasha daryeelka barbaarinta iyo waxbarashadu waxay filayaan dooarar badan (tusaale, daryeelka cunuga ee qoyska, xarumaha daryeelka cunuga, iyo Madaxa Bilaabista/Madaxa Bilawga Barbaarinta iyo barnaamijyada dugsiyada barbaarinta ee gobolka.)
- Horumarinta xirfadu waxay u baahantahay dib u eegis iskeed ah oo hawlaha si loo aqoonsado awoodaha, loo aqoonsado meelaha mustaqbalka u baahan inay koraan, iyo lashaqaynta khibrado waxbarasho oo cusub. Dib u dheehashadu waxa ay kordhisaa ka warqabka wax qabadkiisa waxayna u horseedaa isbeddel shakhsiyeed iyo korriin.

Dhokumantigani waa maxsuulka iskugaynta dedaalka xirfadlayaasha guud ahaan Washington. Xubnaha Dallada Horumarinta Xirfada waxay matalysaa meelo kala duwan oo daryeelka barbaarinta ah iyo goobta aqoontu ku kulmaan marar badan, lagaasoo bilaabo 2007, si loo horumariyo qabyo qoraalkii hroe ee awoodaha. Qoraalkan qabyada ah waxaa loo faafiyey dib u eegis iyo jawaab celin gudaha Washington iyo heer qaranba ZERO TO THREE (DHALASHADA ILAA SADDEX SANO), Xarunta Qaranka ee Dhallaanka, Socod Baradka iyo Qoysaska.

Awoodaha muhiimka ah ee da'da dugsiga ee Gobolka Washington ayaa isku mar la soo saarayaa si loo gaadho awoodahan muhiimka ah. Awoodaha da'da dugsigu waxay khusaysaa daryeel bixiyaasha iyo macalimiinta la shaqaynaya caruurta da'doodu tahay 5 ilaa 12 sano jir. Awoodahan waxay u qalmaan in loo raadiyo si qotodheer oo loo maro aqoon muhiim ah iyo xirfadaha looga baahanyahay xirfadlayaasha da'da dugsiga kuwaasoo ku takhasusay daryeelka iyo waxbarashada dugsiga barbaarinta ilaa dugsi sare. DCYF iyo PDC waxay kala shaqeeyeen Fasaxa Dugsiyada Washington si ay u hubiyaan in xirfadaha asaasiga ah ee da'da dugsiga iyo daryeelka barbaarinta iyo kartida waxbarashadu ay iswaafaqayaan.

**Hadafka Bayaanka:**

*Ilaalinta caruurta iyo xoojinta qoysaska so ay u badhaadhaan.*

Wixi macluumaad dheeraad ah oo khuseeya horumarinta xirfada Washington, booqo

**www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-profdev**.



# I KORITAANKA CARUURTA IYO HORUMARKA

## HEERKA 1-AAD

a. Wuxuu aqoonsanayaa in koritaanku uu u dhaco si iskumid ah.
b. Wuxuu aqoonsanayaa gaadhista horumarinta asaasiga ah ee caruurta lagu aqoonsaday *Waxbarashada Barbaarinta Gobolka Washington iyo Isbarbardhiga Koritaanada*.
c. Wuxuu aqoonsanayaa in dhallaanka iyo kuwa socod baradka ahi koriinkoodu uu dhaco inta lagu jiro inta xidhiidh joogta ah lala samaynayo daryeel bixiyaha.*
d. Wuxuu aqoonsanayaa in caruurtu ay uga jawaabaan xaaladaha si kala duwan.
e. Wuxuu fahmayaa in caruurtu iyo qoysaskoodu ay leeyihiin baahiyo kala duwan.
f. Waxay aqoonsanayaan in caruurtu ay bartaan oo ay kobcaan iyagoo ciyaaraya.
g. La qabsadaan oo wax ka beddelaan daryeelka iyo waxbarashada baahiyaha isbeddelka ee carruurta iyo shakhsiyadaha gaarka ah.
h. Waxay ixtiraamtaa oo aqbashaa kala duwanaanshaha dhaqameed, oo ay ku jiraan qiyamka qoyska iyo meelaha ay ku wanaagsan yihiin, iyo saamaynta wanaagsan ee kala duwanaanshahaas ku yeelan karaan dhaqanka iyo horumarka.

## HEERKA 2-AAD

a. Wuxuu aqoonsanayaa baahiyaha dhallaanka iyo kuwa socod baradka ahi iyo hawlaha daryeel bixinta joogtada ah ay dejiyaan qaab-dhismeedka waxbarashada la isku daray.*
b. Wuxuu aqoonsanayaa gaadhista horumarinta lagu aqoonsaday Waxbarashada Barbaarinta Gobolka Washington iyo Isbarbardhiga Koritaanada.
c. Wuxuu aqoonsanayaa heerka horumarka jidhka, garashada, bulsho/dareen, iyo wadaxidhiidhka ee caruurta.
d. Wuxuu aqoonsanaya shakhsiyaadka kala duwan iyo kala duwanaanshaha shakhsi ahaaneed ee carruurta iyo qoysaska ee horumarka iyo saamaynta ay ku leeyihiin baahiyaha carruurta.
e. Wuxuu laqabsanayaa daryeelka iyo waxbarashada isbadalka baahiyaha caruurta.
f. Wuxuu diiwaangeliyaa iyadoo loo marayo indho-indhaynta cunuga iyo baadhista shay kasta oo khatar ku ah, ku keenaya dib u dhac ama naafo kaasoo muujinaya baahi loo qabo adeegyo gaar ah.
g. Wuxuu dhisaa fahamka carruurta ay haystaan iyo dhaqamada kale iyagoo siinaya fursado ay ku bartaan dhaqanka iyo caadooyinka carruurta iyo qoysaska gudaha goobta.
h. Wuxuu lashaqaynayaa qoyska iyo kooxda barbaarinta si ay u buuxiyaan shuruudaha caruurta baahiyaha gaarka ah qaba.

## HEERKA 3-AAD

a. Waxa uu aqoonsan yahay in la falgalka dadka iyo deegaanku ay kiciyaan shaqada maskaxda ee cunuga sidaas awgeedna ay kaqayb qaataan korriinka iyo kobaca maskaxda.*
b. Wuxuu aqoonsadaa heerarka korriinka ama marxaladaha korriinka caruurta yar-yar laga bilaabo dhalashada ilaa 12 bilood ee kordhinta saddexda bilood ah ee lagu aqoonsaday isbar-bardhigida Daryeelka Waxbarashada iyo Koriinka ee Gobolka Washington.*
c. Waxay aqoonsanaysaa heerarka koriin ee caruurta yar-yar laga bilaabo 13-36 bilood oo lix bilood oo koriin joogto ah.*
d. Wuxuu sharaxayaa kala duwanaanshaha jidheed, bulsho/dareen iyo garasho ee carruurta marka loo eego carruurta kujirta daryeelkooda.
e. Wuxuu sharaxayaa noocyada waxbarasho iyo bulsho ee caruurta iyo hababka waxbarasho ee kala duwan.
f. Wuxuu sharxayaa aragtiyaha hadda jira iyo cilmi-baadhista socota ee daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada sida ay ugh haboontahay carruurta ay daryeelayaan.
g. Wuxuu abuurayaa deegaan iyo khibrado kuwaasoo xaqiijinaya oo ixtiraamaya kala duwanaansahha dhaqanka, luuqada, haybta iyo xaalada dhaqan-dhaqaale.
h. Wuxuu dhiirigeliyaa oo kor u qaadaa falsafad waxbarasho oo loo wada dhan yahay oo la iska kaashado iyada oo kobcinaysa waxbarashada inta iskufilka ah iyo aqbalaada marka ay habboon tahay
i. Helitaanka iyo isticmaalka khayraadka iyo adeegyada qoysaska iyo caruurta baahiyaha gaarka ah qabta.

## HEERKA 4-AAD

a. Wuxuu ku haboon yahay aragtiyaha iyo xidhiidhada ka dhexeeya meelaha koritaanka ee daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada.
b. Wuxuu la falgalayaa macluumaadka koriinka, koboca, iyo heerarka waxbarasho ee shaqsiyaadka iyo kooxaha oo ku haboon hawsha.
c. Lawadaagayaa macluumaadka qoysaska ku haboon xeerarka guud ee koritaanka cunuga iyo kobaca.
d. Muujinayaa aqoonta ay kujirto falsafada iyo hawlaha
e. Wuxuu muujiyaa kartida lagu soo dhaweynayo oo lagu dhexgelin karo kala duwanaanta dhaqanka, luqadda, haybta iyo dhaqan-dhaqaale ee manhajka maalinlaha ah iyadoo lala kaashanayo qoysaska iyo daryeel bixiyaasha si loogu daro oo loo qiimeeyo qaybaha luqadda iyo caadooyinka hawl maalmeedka.
f. Wuxuu muujiyaa aqoonta saamaynta noolayaasha iyo waxyaabaha saameeya horumarka deegaanka.
g. Wuxuu muujiyaa aqoon ku saabsan hab fikirka iyo hawlaha iyo aqoonsiga xadiga koritaanka caruurta yar-yar.



## Abuurista Deegaan Waxbarasho iyo Manhajka Guud

### HEERKA 1-AAD

a. Waxa uu aqoonsanayaa in baahiyaha dhallaanka iyo kuwa socod baradka ah iyo daryeelka joogtada ah ay dejiyaan qaabka jadwal maalmeedka.*
b. Waxay raacaan jadwal isubadalaya si joogto ah kaasoo ku haboon dhamaan caruurta oo dhan.
c. Wuxuu si joogto ah uqorsheeyaa hawlaha maalinlaha ah ee ay kujiraan hawlaha dibada iyo kuwa guduhuba.
d. Wuxuu ilaaliyaa deegaan jidh ahaan iyo dareen ahaan badqaba oo wuxuu abuuraa goobo waxbarasho oo diirada lagu saarayo badqabka, caafimaadka iyo ciyaarta/sahminta.
e. Wuxuu aqoonsanayaa dhallaanka iyo kuwa socod baradka ee u baahan goobaha si ay kor ugu qaadaan dhaq-dhaqaaqa iyo sahminta.*
f. Wuxuu siinayaa caruurta doorasho.
g. Wuxuu taageeraa oo dhiirigeliyaa kaqaybqaadashada caruurta ee hawlaha kala duwan.
h. Wuxuu qorsheeyaa hawlaha, kooxaha yar iyo kuwo waawayn.
i. Wuxuu siinayaa waxqabadyo kala duwan oo ku jira heerarka korriinka kala duwan ee carruurta ee kusugan goobta.
j. Wuxuu xaqiijiyaa in agabka waxbarashadu ay yihiin kuwa carruurtu heli karto oo la beddelo ama la ged-gediyo si ula kac ah.





## HEERKA 2-AAD

a. Wuxuu ilaaliyaa oo la socdaa jadwal maalinle ah oo u oggolaanaya hab-raacyada caadiga ah ee cunuga iyo hab-socodka dabacsan ee kuwa socod baradka ah.*

b. Wuxuu dheelitir siinayaa cunuga la hayo oo hawlaha daryeel bixiyahana/macalinka, inta badan waxa raaca hogaanka cunuga.*

c. Waxay dheelitir siinaysa cunuga lahagayo iyo hawlaha daryeel bixiyaha/macalinka ee maalinta cunuga oo dhan.*

d. Wuxuu aqoonsanayaa in manhajka lagu siiyo habayn deegaan, hawlo waxbarasho iyo isdhexgal.

e. Ka faa'iidaystaa fursadaha iyo danaha cunuga si ay u beddelaan manhajka iyo hawlaha.

f. Wuxuu abuuraa jawi waxbarasho oo ay ka go'antahay hurdo, cunto, beddelasho xafaayad, diyaarinta cuntada iyo diyaarinta masaasada, baadhista jidhka iyo dhaqdhaqaaqa, ciyaarta shaqsiga ah, ciyaarta kooxda, iyo kaydinta.

g. Wuxuu dhiirigalinayaa waxbarashada caruurta iyadoo loo marayo ciyaar iyo isdhexgal.

h. Wuxuu ilaaliyaa, maamulaa oo uu koriyaa jadwalka maalinlaha ah ee ku haboon caruurta yar-yar.

i. Wuxuu bixiyaa jawi xiiso leh oo amaan ah oo dhiirigeliya ciyaarta, raadinta, isdhexgalka iyo barashada iyadoo la aqoonsanayo in fasalka/barta dhexe, agabka, hawl maalmeedka, iyo xidhiidhka ay dhamaantood ku saamaynayaan deegaanka.

j. Wuxuu diyaariyaa xarumo waxbarasho oo waxtar leh oo ku habboon kuwaas oo kor u qaada raadinta firfircoon iyo wada ciyaarista.

k. Wuxuu doortaa agab ku habboon heerarka korriinka ee dhammaan carruurta goobta dhexdeeda.

l. Wuxuu bixiyaa goob isku dheeli tiran oo udhaxaysa goobaha shaqaynaya iyo meelaha degan, shaqsi iyo koox, iyo hawlaha gudaha iyo dibadda.

m. Wuxuu adeegsadaa agabka muujinaya aqbalaada dhammaan jinsiga, qoyska, midabka, luqadda, dhaqanka, qowmiyadda, dhaqan-dhaqaale iyo baahiyaha gaarka ah.

n. Wuxuu fahmaa aragtiyaha aasaasiga ah ee maareynta fasalka, farsamooyinka hagitaan shaqsiyeed iyo isdhexgalka carruurta leh baahiyaha gaarka ah.

## HEERKA 3-AAD

a. Wuxuu adeegsadaa fursadaha maalinta oo dhan si uu isku dhexgaliyo waxqabadyada fududeeya horumarinta luqadda, garaadka/dhaqdhaqaaqa guud, shucuurta-bulshada iyo meelaha garashada.
b. Wuxuu kor u qaadaa koritaanka carruurta ee ku habboon da'da, dabeecadaha is-xakamaynta iyadoo la isticmaalayo hawlo joogto ah, jadwalka iyo naqshadaynta fasalka.
c. Wuxuu dhisaa fahamka carruurta iyo dhaqamadooda kale iyagoo siinaya khibrado dhaqameed iyadoo la isticmaalayo heeso, sheekooyin iyo luqad uu ilmuhu yaqaan.
d. Wuxuu dhisaa hanka carruurta ee dhaqamadooda, qoysaskooda iyo bulshooyinkooda iyagoo abuuraya xarumo waxbarasho oo ka tarjumaya dhaqanka iyo xubnaha bulshada ee carruurta (tusaale, mawduucyo dhaqan ahaan ka tarjumaya, luqadda guriga oo ka muuqata si sax ah, walxaha sawirada qoyska guriga oo ay kujiraan deegaanka).
e. Qorsheynta iyo habaynta manhajka iyo deegaanka, oo ay ku jiraan xulashada agabka ku habboon heerarka korriinka carruurta ee goobta dhexdeeda.
f. Wuxuu adeegsadaa agabka, hawlaha iyo xeeladaha ku habboon manhaj isku dhafan oo ay ku jiraan akhriska iyo qoraalka, xisaabta, sayniska, cilmiga bulshada, caafimaadka, badbaadada, nafaqada, farshaxanka, muusiga, riwaayadaha
g. Wuxuu abuuraa jawi waxbarasho kaasoo u oggolaanaya shakhsiyaadka inay sii haystaan oo ay qadariyaan kuwooda iyo kuwa kale afkooda, qowmiyadda iyo hiddaha dhaqanka.

## HEERKA 4-AAD

a. Wuxuu dhisaa manhajka cunuga yar ee socod baradka ah isagoo isticmaalaya hawlo joogtada, doorooshoyinka cunuga, sifooyinka, iyo baahiyaha iyo kartida shakhsi ahaaneed ee saldhigga u ah manhajka.*
b. Wuxuu fahmaa baahiyaha waxbarasho ee kala duwan ee caruurta yar-yar, caruurta soconaysa iyo kuwo socod baradka ah, wuxuuna dejiyaa manhaj ka tarjumaya baahiyaha kala duwan.*
c. Wuxuu ku abuuraa wax-barashada deegaanka isagoo isticmaalaya agabka, doorashad cunuga iyo ciyaarta sidii macnaha guud ee kor loogu qaadayo horumarka iyo waxbarashada shaqaynaysa.
d. Qorsheeyaa, fuliyaa oo qiimeeyaa deegaanka waxbarashada iyo manhajka si kor loogu qaado awoodda waxbarashada iyo koritaanka dhammaan carruurta shakhsi ahaan iyo koox ahaan, oo ay ku jiraan carruurta leh baahiyaha gaarka ah.
e. Wuxuu doortaa, isticmaalaa oo qiimeeyaa tiknoolajiyada ku habboon da'da carruurta ee goobta dhexdeeda.
f. Wuxuu xaqiijiyaa in deegaan fududeeya waxbarashada dhammaan dhinacyada koriinka: garashada, luqadda, jidhka, bulshada iyo shucuurta sida lagu aqoonsaday isbar-bardhiga Daryeelka Barbaarinta iyo Horumarinta ee Gobolka Washington.
g. U qorsheeyaa deegaan carruurta leh baahiyaha gaarka ah ama qaababka waxbarasho ee ku saleysan talooyinka iyo waxyaabaha ka imanaya qoysaska iyo khabiirada.
h. Wuxuu muujiyaa aqoonta iyo kartida lagu beddeli karo deegaanka si loo maareeyo dabeecadaha marka loo baahdo.
i. Wuxuu horumariyaa xeelado u oggolaanaya carruurta inay door muhiim ah ka ciyaaraan qorsheynta manhajka.
j. Sharaxaa oo adeegsadaa aragtiyaha waaweyn ee daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada, oo ay ku jirto cilmi-baadhista aasaasiga ah ee ka dambaysa aragtiyaha.

## HEERKA 5-AAD

a. Wuxuu naqshadeeyaa manhajka iyo/ama wuxuu taageeraa manhajku oo la wadaagaa naqshadaynta manhajka iyo taageeridda kuwa kale.
b. Wuxuu barayaa dadka kale sida loo nashqadeeyo manhajka.
c. Wuxuu sharxayaa, falanqeynayaa, qiimeynayaa oo isticmaalayaa aragtida hadda iyo cilmi-baadhista nashqada manhajka iyo deegaanka.
d. Wuxuu ku wargalinayaa aragtiyaha waaweyn, cilmi-baadhista iyo arimaha la xidhiidha daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada dhallaanka-socodbaradka.

# Kor Uqaadista Koritaanka Jidheed

## HEERKA 1-AAD

a. Wuxuu fahmayaa in xirfadaha korniinka iyo dhaqdhaqaaqu u horumariyaan si joogto ah.
b. U ogolaanayaa dhallaanka iyo kuwa socod baradka fursadaha maalinlaha ee korniinka iyo dhaqdhaqaaqa.*
c. Ula falgalayaa si haboon caruurta inta lagu jiro hawlaha jidheed.
d. Wuxuu qorsheynayaa korniinka maalinlaha ee dibada iyo wakhtiga ciyaarta.
e. Wuxuu qorsheynayaa korniinka gudaha ee wakhtiga ciyaarta marka in dibada la joogaa aanay ahayn macquul cimilada awgeed.
f. Wuxuu si firfircoon uga qeybgalayaa hawlaha caruurta.
g. Wuxuu hubinayaa badqabka cunuga inta lagu jiro dhaqdhaqaaqa ciyaarta.

## HEERKA 2-AAD

a. Wuxuu qorsheynayaa hawlaha jimicisiga gudaha iyo dibada iyo waxqabadyada murqaha jirka kuwa waaweyn iyo kuwa yaryarba.
b. Wuxuu soosaarayaa khibradaha dareenka ee caruurta.
c. Wuxuu abuurayaa oo aqoonsanayaa fursadaha dhammaan maalintii marka dhallaanka iyo kuwa socod baradka ay sameynayaan dhaqdhaqaaq jidheed.*
d. Wuxuu isku darayaa agabka, hawlaha, qalabka iyo fursadaha kala duwan si kor loogu qaado horumarinta jidhka caruurta.
e. Wuxuu kudarayaa qeybaha dhaqanka guriga caruurta iyo qoyska ku ciyaaridda goob dibada.
f. Wuxuu ku lugyeelanayaa caruurta qabta baahiyaha gaarka ee korniinka iyo hawlaha dhaqdhaqaaqa wuxuuna siinayaa caawimo iyo taageero markay haboon tahay.
g. Wuxuu qorsheynayaa hawlaha isku sidka korniinka jidhka iyo farshaxanka iyo dhammaan qeybaha manhajka.



## HEERKA 3-AAD

a. Wuxuu u sahlayaa hawlaha caruurta leh baahiyaha gaarka ah.
b. Wuxuu aqoonsanayaa heerarka horumarinta dhaqdhaqaaqa murqaha waaweyn iyo kuwa yaryar ee dhallaanka ee laga bilaabo dhalashada ilaa 12 bilood korodh saddex bilood ah sida lagu aqoonsaday *Hal-Beegyada Waxbarshada Barbaarinta iyo Horumarinta ee Washington.**
c. Wuxuu aqoonsanayaa heerarka horumarinta dhaqdhaqaaqa murqaha waaweyn iyo kuwa yaryar ee socod baradka ee laga bilaabo 13-36 bilood korodh lix billod ah sida lagu aqoonsaday *Hal-Beegyada Waxbarshada Barbaarinta iyo Horumarinta ee Washington.**
d. Wuxuu aqoonsanayaa in waxqabadyada iyo fursadaha dhaqdhaqaaqa murqaha waaweyn iyo kuwa yaryar ee dhallaanka lagasoo saaro astaanta dabiiciga ee dhallaanka wakhtiga kicitaanka iyo diyaargarowga ay kula macaamilayaan dadka waaweyn iyo deegaanka.*
e. Wuxuu aqoonsanayaa marka guulaha hal-beegyada korniinka jidhku aanay jirin wuxuuna hubinayaa khayraadka iyo gudbinaha ku haboon.
f. Wuxuu ugu sharxayaa, si macno weyn leh, qoysaska iyo xirfadlayaasha kale muhiimada kudarka dhaqdhaqaaqa iyo socodka, qeybaha kale ee korniinka (luuqada/akhriska iyo qoraalka, garaadka).

## HEERKA 4-AAD

a. Wuxuu qiimeynayaa waxtarka iyo haboonaanshaha hawlaha korniinka jidhka ee dhallaanka iyo socod baradka isagoo maraya indho-indhaynta jawaabaha cunuga iyo isbadelada markay haboon yihiin.*
b. Wuxuu abuurayaa hawlo dhiirigalinaya in caruurta heerar awoodo kala duwan leh wada ciyaaraan oo wax wada bartaan.
c. Wuxuu soo dhaweynayaa jawaabcelinta iyo natiijada qoysaska si loo hubiyo in caadooyinka dhaqanka iyo qiyamka la ixtiraamo marka la nashqadaynaayo hawlaha korniinka iyo dhaqdhaqaaqa.
d. Wuxuu isticmaalayaa indho-indhayn iyo jawaabcelin si loo qiimeeyo waxtarka iyo haboonaanshaha hawlaha korniinka jidhka ee shakhsiyaadka iyo kooxaha wuxuuna wax kabadelayaa hawlaha si loo buuxiyo baahiyaha shakhsiyaadka iyo kooxaha.

## HEERKA 5-AAD

a. Wuxuu fahmayaa in korniinka jidhka ee caruurta yar-yar ka bilaabmo madaxa iyo ilaa hoos u raaco qoorta, jidhka kale, jidhka hoose iyo qeybaha fog ilaa dhexda.*
b. Wuxuu sharxayaa sida korniinka jidheed iyo qeybaha kale ee korniinku iskula xidhiidhaan.
c. Wuxuu isticmaalayaa barashada noocyada dhaqdhaqaaqa jidhka marka wax la baraayo dadka kale.
d. Wuxuu nashqadaynayaa oo dhiirigalinayaa nidaamyada kale ee waxbarasho.
e. Wuxuu sharxayaa, falanqeynayaa, qiimeynayaa oo isticmaalayaa aragtida hadda iyo cilmi-baadhista kor u qaadaysa
korniinka jidhka.
f. Wuxuu si wadajira ula shaqeynayaa wakaaladaha kale si loo baadho oo loola xidhiidho macluumaadka khuseeya kor u qaadista korniinka jidhka.



## Kor Uqaadista Koritaanka Garashada

### HEERKA 1-AAD

a. Wuxuu fahmayaa in xirfadaha iyo awoodaha maskaxdu u horumaraan si joogto ah.
b. Wuxuu ka hadlayaa oo la ciyaarayaa caruurta maalintii oo dhan.
c. Wuxuu siinaya caruurta qalab kala duwan oo ay ku ciyaaraan waxna ku ogaadaan.
d. Wuxuu siinayaa wadooyinka la saadaalin karo oo joogto ah.
e. Wuxuu u jawaabayaa caruurta markay ooyayaan ama isku buuqaan.
f. Wuxuu dhiirigalinayaa rabitaanka iyo sahaminta wuxuuna si joogto ah ugu hawlanaanayaa in raadqaadka saaxiib dhow ahaan.*
g. Wuxuu siinayaa caruurta yar-yar iyo raadqaadka fursado ay ku ogaadaan astaamaha badqabka, ashyaada haboon iyagoo u saamaxaya inay fiiriyaan, taabtaan, dhadhamiyaan (ama afka), uriyaan oo maqlaan ashyaada.*

### HEERKA 2-AAD

a. Wuxuu ka qeybqaadanayaa macaamilka hadalka marka dadka waaweyn isticmaalaan kalmado soo noqnoqda, badelayaa siiqada codka, iyo xarakaada wajiga iyo jidha ee aan ahayn hadalka si loola macaamilo cunuga.
b. Wuxuu aqoonsanayaa in waxbarashada caruurta yar-yar iyo raadqaadku ka dhacdo aaga xidhiidhka,
c. Wuxuu ilaalinayaa doorka dadka waaweyn ee fududeeye ama saaxiib ahaan ay ka ciyaaraan iyagoo raacaya hogaanka ilmaha yar, oo u saamaxaya ilmaha yar inuu kasoo jeedsado waxyaabaha jeediaya marka falcelinada ilmaha yar muujianayaan.*
d. Wuxuu dhiirigalinayaa ciyaarta si kor loogu qaado korniinka maskaxda.
e. Wuxuu siinayaa deegaanka aqoon qani ku ah si loogu abuuro fursado akhriska iyo qoraalka ah.
f. Wuxuu siinayaa fursado waxbarasho oo ka turjumaya kala duwanaanshaha dhaqanka, luuqada, isirka iyo dhaqaalaha bulsho ee caruurta fasalka.
g. Wuxuu weydiinayaa su'aalo furan oo la xidhiidha.
h. Wuxuu siinayaa shaqooyin iyo fursado dhiirigalinaya rabitaanka, sahaminta iyo xalinta dhibaatooyinka ku haboon heerarka korniinka iyo qaababka waxbarashada ee caruurta.
i. Wuxuu ku hogaaminayaa xisaabta, sayniska iyo sahaminta dabiiciga iyadoo laga jawaabayo xiisaynta caruurta.
j. wuxuu siinayaa barashada khibrado heerarka kala duwan ee koritaanka.

## HEERKA 3-AAD

a. Wuxuu dib u booqanayaa hawlaha waxbarasho ee caruurta si ay u dhisi karaan xaruus iyo aqoonsi guud oo noqda mid guulaysta.
b. Wuxuu nashqadaynayaa fursadaha waxbarasho ee ka turjumaya dhaqamada lagu sheegay barnaamijka bulshada.
c. Wuxuu sharxayaa korniinka maskaxda iyo xidhiidhka ka dhexeeya ee khibradaha horee caruurtu kala kulmaan dadka kala duwan.
d. Wuxuu muujinayaa ujawaabista caruurta yar-yar iyadoo loola dhaqmaayo saaxiib ahaan, loo dejinaayo deegaan, lana siinaayo agab xiiso leh oo ku haboon.*
e. Wuxuu aqoonsanayaa marka caruurta yar-yar iyo raadqaadka la wargaliyo ee ay diyaarka u yihiin la macaamilka dadka waaweyn, caruurta kale, ama agabka deegaanka iyo sidoo kale marka caruurta yar-yar iyo raadqaadka la jeediyo.*
f. Wuxuu aqoonsanayaa marka guulaha hal-beega horumarinta maskaxdu aanu jirin ee loo baahan yahay feejignaan dheeraada.
g. Wuxuu ka caawinayaa in caruurtu ku sahamiyaan fikradaha sida goobta, wakhtiga, qaabka iyo tirada qaabab micno weyn leh hawlahooda maalinlaha.
h. Wuxuu qorsheynayaa oo ku hagayaa xisaabta, sayniska iyo sahaminta dabiiciga iyadoo laga jawaabayo xiisaynta caruurta.
i. Wuxuu siinayaa fursado caruurtu k agaasinto, isku barbardhigto, oo ku kala saarto fikradaha, kalmadaha, ashyaada, iyo dareenamada iyo in la xaliyo masalooyinka.
j. Wuxuu siinayaa hawlo kor u qaadaya fahamka caruurta ee xajmiga, qaabka, midabka iyo jihada.
k. Wuxuu dhisayaa oo balaadhinayaa luuqada caruurta isagoo isticmaalaya kalmado iyo jumlado sharaxaad leh.

## HEERKA 4-AAD

a. Wuxuu kala saarayaa ciyaarta iyo isdhexgalka si uu u waafaqo doorashada gaarka, awoodaha iyo baahiyaha waxbarasho ee caruurta.
b. Wuxuu qorsheynayaa, hirgalinayaa, qiimeynayaa oo wax ka badelayaa manhajka si loogu jiheeyo caruurta yar-yar iyo raadqaadka sahaminta oo loogu dhiirigaliyo inay dhisaan aqoontooda gaarka ah.*
c. Wuxuu qorsheynayaa, hirgalinayaa, qiimeynayaa oo waxka badelayaa manhajka si loogu jiheeyo caruurta xalinta masalooyinka oo loogu dhiirigaliyo caruurtu inay dhisaan aqoontooda gaarka ah.
d. Wuxuu hubinayaa in caruurta yar-yar iyo raadqaadka maskaxiyan si fiican loo koriyey iyadoo la dooranaayo, agaasimaayo lana isticmaalaayo agab iyo aalado tayo-sare leh oo lana qabsanaayo deegaanka si loo taageero helitaanka iyo guusha xirfadaha cunug kasta.*
e. Wuxuu hubinayaa in caruurta caqliyan loo imtaxaamay iyadoo la dooranaayo, agaasimaayo lana isticmaalaayo agab iyo aalado tayo-sare leh oo lana qabsanaayo deegaanka si loo taageero helitaanka iyo guusha xirfadaha cunug kasta.
f. Wuxuu aqoonsanayaa heerka feejignaanta iyo dhaqdhaqaaqa caruurta yar-yar inuu saameeyo awooda waxbarashada ee dhanka lamacaamilka dadka waaweyn.*
g. Wuxuu aqoonsanayaa in isdhexgalka qoyska ee caruurta yar-yar iyo raadqaadka iyo daryeelka loo bixiyo joogto si gaara loola tacaalo dhaqankastaba.*
h. Wuxuu isticmaalayaa deegaan mustaqbal waxbarasho si loo diyaariyo waayo-aragnimo waxbarasho loona xusho istaraatiijiyadaha waxbarasho ee caruurta yaryar.

### HEERKA 5-AAD

a. Wuxuu sharxayaa, falanqeynayaa, qiimeynayaa oo isticmaalayaa aragtida hadda iyo cilmi-baadhista kor u qaadaysa korniinka maskaxda.
b. Wuxuu kala shaqeynayaa bulshada khayraadka iyo wakaaladaha si loo cilmi-baadho oo loogula xidhiidho macluumaadka horumarinta maskaxda.
c. Wuxuu aqoonsanayaa oo sheegayaa feejignaana caruurta yar-yar iyo diyaargarowgooda la macaamilka dadka kale.*
d. Wuxuu aqoonsanayaa marka caruurta yar-yar iyo raadqaadku isku buuqsan yihiin wuxuuna hirgalinayaa istaraatiijiyadaha ku haboon ee waxtarka u leh dejinta iyo ka farxinta cunuga.*
e. Wuxuu aqoonsanayaa in caruurta yar-yar iyo raadqaadku leeyihiin hab-dhaqan waxbarasho oo ku saleysan dhaqan kasoo qeyb muhiima ka ah daryeel-bixinta iyo horumarinta manhajka.*

## Kor Uqaadista Luuqada/Horumarinta Wadaxidhiidhka

### HEERKA 1-AAD

a. Wuxuu kala hadalayaa oo ku dhiirigalinayaa wadaxidhiidhka hadal iyo midka aan hadalka ahayn caruurta yar-yar iyo raadqaadka.*
c. Wuxuu dejinayaa oo gudbinayaa xuduudaha hab-dhaqanka la aqbali karo.
d. Wuxuu uga jawaabayaa hab-dhaqanka caruurta qaab dhiirigalinaya isxakameynta.
e. Wuxuu siinayaa deegaan taageero leh oo caruurtu ku baran karto kuna sameyn karto hab-dhaqano haboon oo la aqbali karo shakhsiyan iyo koox ahaanba.
f. Wuxuu raacayaa qaabab tilmaamo wacan oo toosa iyo kuwo aan toos ahayn oo haboon wuxuuna iska ilaalinayaa qaababka xun.
g. Wuxuu siinayaa deegaan ka caawinaya cunug kasta inuu ogaado, aqbalo, oo ku faano wuxuuna horumarinayaa dareen madaxbanaani iyo lahaansho.
h. Wuxuu la dhisayaa xidhiidho la aamini karo caruurta, islmarkaana siinayaa badqab jidheed iyo dareen.
i. Wuxuu isticmaalayaa istaraatiijiyado si looga caawiyo caruurtu inay bartaan sida loogu sheegto dareenkooda, loogu xaliyo dhibaatooyinka looguna go'aan qaato habab wanaagsan.
j. Wuxuu u gudbinayaa qoysaska qeybaha walaaca, horumarinta istaraatiijayado wadashaqeyn si loo maamulo dhibaatooyinka.
k. Wuxuu wax ka qabanayaa hab-dhaqanka ama xaalada xun, halkii cunuga la calaamadin lahaa.
l. Wuxuu iswaafajinayaa deegaanka waxbarasho iyo manhajka si loo yareeyo hab-dhaqanada aan wacnayn.

### HEERKA 3-AAD

a. Wuxuu tilmaamayaa fahamka hab-dhaqanka caruurta yar-yar wuxuuna uga jawaabayaa qaab taageero leh oo wanaagsan.*
b. Wuxuu ilaalinayaa rajooyinka haboon ee caruurta yar-yar iyo raadqaadka feejignaantooda, xiisahooda, awoodahooda bulsho, iyo baahiyahooda jidheed.*
c. Wuxuu u ogolaanayaa caruurta yar-yar iyo raadqaadka ikhtiyaarka hawlaha jadwalka maalinlaha.*
d. Wuxuu siinayaa iskudheelitir haboon hawlaha cunugu hogaamiyo ee cunugu ku hago hawlaha dadka waaweyn.
e. Wuxuu ku xidhayaa xeerarka tilmaamta aqoonta shakhsiyaadka caruurta iyo heerarka korniinka.
f. Wuxuu aqoonsanayaa kana jawaabayaa walaacyada ahab-dhaqanka gaarka ee la xidhiidha isku buuqa korniinka ama dareenka.

### HEERKA 4-AAD

a. Wuxuu aqoonsanayaa in caruurta yar-yar ku gudbiyaan baahiyahooda iyagoo maraya hab-dhaqano kala duwan oo tilmaamaya in ilmaha yar diyaar u yahay inuu soo jiito, isagoo dareemayn wax dhibaato jidheed ah, hurdo isku buuqa.*
b. Wuxuu isticmaalayaa aragtiyaha horumarinta cunuga si loo horumariyo tilmaamta cunuga.
c. Wuxuu isticmaalayaa qiimeynta cunuga si gooni looga dhigo loona horumariyo tilmaamta cunuga.
d. Wuxuu tilmaamayaa aqoonta waxbarasho iyo nidaamyada hagiaanka ee iskudarka caruurta leh iyo kuwa aan lahayn baahiyo gaara.
e. Wuxuu kala shaqeynayaa qoysaska inay diyaariyaan filashooyinka ku haboon shakhsian iyo hab-dhaqanka cunuga.

### HEERKA 5-AAD

a. Wuxuu diyaarinayaa siyaasado qoran oo ka jawaabaya isdhexgalka iyo daryeel-bixinta, oo ay ku jiraan tilmaamta cunuga ee raadqaadka.*
b. Wuxuu sharxayaa shuruucda farogalinta iyo xalinta khilaafka ee ciyaarta iyo waxbarashada caruurta.
c. Wuxuu diyaarinayaa qorshayaasha tilmaamta gaarka, isagoo helaya xirfadlayaasha ku haboon si ay u caawiyaan marka loo baahdo.
d. Wuxuu sharxayaa, isticmaalayaa, falanqeynayaa, oo qiimeynayaa fikirka hada iyo cilmi-baadhista tilmaamta shakhsiga.

## Kor u Qaadida Khibradaha Kooxaha

### HEERKA 1-AAD

a. Wuxuu siinayaa taageero iyo kormeer dadka waaweyn oo joogto ah caruurta yar-yar markay is dhexgalayaan midba midka kale.*
b. Wuxuu siinayaa taageero qof weyn marka loo baahdo isla markaana kor loo qaadayo isdhexgalka caruurta raadqaadka ah.*
c. Wuxuu siinayaa nidaamin iyo ikhtiyaar markay la shaqeynayaan caruurta.
d. Wuxuu u ogolaanayaa caruurta yar-yar iyo raadqaadka jadwalada si loo sameeyo jadwal maalinle ah.*
e. Wuxuu wax uga qabanayaa hawlaha iyo isbadelada jadwalka si cad oo dulqaad leh.

## HEERKA 2-AAD

a. Wuxuu dhisayaa jadwalka hawl maalmeedka caruurta yar-yar ee ku xeeran jadwalka shaqada daryeel-siinta ilamaha yar ee koox ku jira markay haboon tahay.*
b. Wuxuu dhisayaa jadwalka hawlaha maalinlaha ee raadqaadka isagoo isticmaalaya jadwalada iyo aqoonta diyaargarowga caruurta si looga jawaabo jadwalada kooxaha ee markasta iyo hawlaha.*
c. Wxuu ku hogaaminayaa hawlaha deegaan wacan, degan oo farxadle.
d. Wuxuu horey ugu wargalinayaa caruurta isbadelada hawlaha iyo jadwalada.
e. Wuxuu u dhisayaa xidhiidh kalsooni leh caruuurta oo ah seeska tilmaam wanaagsan iyo anshax.
f. Wuxuu qiyaasayaa oo joojinayaa hab-dhaqanka rabshada leh ee caruurta.
g. Wuxuu tilmaamayaa wacyiglinta xuduudaha iyo awoodaha cunug kasta isticmaalayaa farsamooyinkaasi, wuxuuna sharxayaa shuruucda heerka cunuga ee fahamka isagoo isticmaalaya farsamooyinka kala duwan.

## HEERKA 3-AAD

a. Wuxuu ku siinayaa fursado kala duwan deegaanka isagoo maraya hawlaha caruurta yar-yar si ay uga wada shaqeeyaan.*
b. Wuxuu siinayaa khibrado mashquuliya caruurta oo ay kaga jawaabaan waxay xiisaynayaan.
c. Wuxuu qorsheynayaa oo tilmaamayaa hawlaha kor loogu qaadaayo labadaba ciyaarta isku midka iyo wadashaqeynta.
d. Wuxuu qorsheynayaa oo tilmaamayaa hawlaha kor u qaadaya xidhiidhada waxtarka leh ee caruurtu la leeyihiin asaagood, qoyska, shaqaalaha, iyo bulshada.
e. Wuxuu dhiirigalinayaa xidhiidho, wadaxidhiidh, iyo istaraatiijayado tilmaam oo wanaagsan, oo ay ku jiraan xalinta dhibaatada iyo wadaxaajoodka deegaanka waxbarasho dhexdiisa.

## HEERKA 4-AAD

a. Wuxuu isticmaalayaa aragtiyaha horumarinta raadqaadka ilaa farsamooyinka maamulka kooxda.*
b. Wuxuu isticmaalayaa qiimeynta cunuga si gooni looga dhigo loona horumariyo maamulka kooxda.
c. Wuxuu qiimynayaa oo iswaafajinayaa khibradaha kooxaha si loo hubiyo in dhammaan caruurtu wax baranayso.
d. Wuxuu ku darayaa caruurta dhammaan awood kasta leh koox, isagoo raacaya sharaxaada iyo nidaamka tilmaamta haboon.
e. ee caruurta yar-yar iyo raadqaadka.* shaqaalaha, wakhtiga) si waxtar leh.
f. barnaamijyada waxbarashada.
g. kooxaha, xuduudahooda.

## HEERKA 5-AAD

a. Wuxuu u diyaarinayaa xirfado wadashaqeyn kooxo raadqaadka oo diirada saaraya u shaqeynta kooxo kooban ahaan, wada xaajoodka, tanaansulka iyo dhib xalinta .*
b. Wuxuu sharxayaa, isticmaalayaa, falanqeynayaa, oo qiimeynayaa fikirka hada iyo cilmi-baadhista khibradaha kooxaha.

# VII QORSHEYNTA IYO HORMARINTA BARNAAMIJKA

## Qorsheynta iyo Qiimeynta Barnaamijka

### HEERKA 1-AAD

a. Wuxuu u dhaqmayaa shaqaale masuula oo ka qeybalayaa kooxda barnaamijka.
b. Wuxuu ilaalinayaa diwaanada macquulka ah.
c. Wuxuu u hogaansamayaa siyaasadaha barnaamijka wuxuuna sheegayaa shuruucda iyo sharciyada liisanka daryeelka cunuga.

### HEERKA 2-AAD

a. Wuxuu taageerayaa bayaanka himilada barnaamijka.
b. Wuxuu nidaaminayaa qorshayaasha, ilaalinayaa diwaanada, oo ugu gudbinayaa qoysaska iyo shaqaalaha si wanaagsan.
c. Wuxuu diyaarinayaa qorshayaasha iyo manhajka fasalka.
d. Wuxuu dooranayaa qalabka iyo agabka ku haboon dhaqangalinta.
e. Wuxuu qorayaa ujeedooyinka iyo hadafyada hawlaha.
f. Wuxuu isticmaalayaa khayraadka si loo hubiyo shaqo waxtar leh.
g. Wuxuu caawinayaa soo ururinta macluumaadka qiimeynta.

### HEERKA 3-AAD

a. Wuxuu hadal ku sharxayaa xidhiidhka ka dhaxeeya aragtiyaha barnaamijka iyo shaqada maalinlaha.
b. Wuxuu qorsheynayaa tababarada iyo barnaamijyada waxbarasho.
c. Wuxuu qorsheynayaa oo u baahan yahay agabka iyo qalabka haboon ee barnaamijka.
d. Wuxuu ka qeybgalayaa qorsheynta istaraatiijiyada iyo dejinta hadafka barnaamijka.
e. Wuxuu fulinayaa daraasaadka barnaamijka.
f. Wuxuu aqoonsanayaa muhiimada qiimeynta, caawinta qiimeynta waxtarka barnaamijka.

### HEERKA 4-AAD

a. Wuxuu isticmaalayaa aqoonta qawaaniinta fadaraalka, gobolka iyo xeerarka maxaliga, iyo nidaamyada xirfadeed si loo siiyo xeerar caafimaad iyo badqaba caruurta yar-yar iyo raadqaadka.*
b. Wuxuu diyaarinayaa manhajka barnaamijka.
c. Wuxuu u maamulayaa khayraadka barnaamijka (maaliyada, shaqaalaha, wakhtiga) si waxtar leh.
d. Wuxuu tilmaamayaa awooda lagu agaasimaayo lagana shaqeynaayo noocyada daryeelka barbaarinta iyo barnaamijyada waxbarasho.
e. Wuxuu ugu gudbinayaa si waxtarleh kooxaha gudida/golaha.
f. Wuxuu aqoonsanayaa qaababka qiimeynta wuxuuna fahmayaa xadidaadooda.



### HEERKA 5-AAD

a. Wuxuu sharxayaa, isticmaalayaa, falanqeynayaa, oo qiimeynayaa aragtida hada, cilmi-baadhista iyo siyaasada qorsheynta iyo qiimeynta barnaamijka.
b. Wuxuu diyaarinayaa istaraatiijiyadaha xidhiidhka dadweynaha si loo asaaso barnaamijka bulshada.
c. Wuxuu hubinayaa in barnaamijku buuxiyey baahiyaha kala duwanaanshaha oo uu ka turjumaayo ka qeyb ahaanshaha caruurta, qoysaska, shaqaalaha, iyo saaxiibada bulshada.
d. Wuxuu aqoonsanayaa arimaha sharci ee la xidhiidha daryeelka barbaarinta wuxuuna kala shaqeynayaa kooxaha bulshada si loo turjumo.
e. Wuxuu diyaarinayaa oo hirgalinayaa siyaasadaha barnaamijka.

## Maareeynta Shaqaalaha

### HEERKA 1-AAD

a. Wuxuu si waxtarle u taageerayaa shaqaalaha, mutadawiciinta, iyo xirfadlayaasha.

### HEERKA 2-AAD

a. Wuxuu caawinayaa xubnaha shaqaalaha iyo xirfadlayaasha.

### HEERKA 3-AAD

a. Wuxuu qiimeynayaa oo ka shaqeynayaa si loo xoojiyo kooxda shaqaalaha, maamulka, iyo mutadawiciinta.
b. Wuxuu siinayaa wadooyin wadaxidhiidh waxtarleh dhaqaalaha iyo maamulka.

### HEERKA 4-AAD

a. Wuxuu qorsheynayaa, carbinayaa, tababarayaa, kormeerayaa, oo qiimeynayaa shaqaalaha.
b. Wuxuu qorsheynayaa, carbinayaa, tababarayaa oo kormeerayaa mutadawiciinta.
c. Wuxuu qorsheynayaa oo ulinayaa fursadaha horumarinta shaqaalaha.
d. Wuxuu kormeerayaa macalimiinta ardeyda iyo casharka ardeyda.
e. Wuxuu siinayaa hogaamin xoogaan iyo jiho hiigsi leh.

### HEERKA 5-AAD

a. Wuxuu diyaarinayaa carbinta shaqaalaha, xulashada iyo barnaamijyada haysashada.
b. Wuxuu nashqadeynayaa oo hirgalinayaa sharaxaada shaqada shaqaalaha iyo qaababka qiimeynta iyo nidaamyada.
c. Wuxuu sharxayaa, falanqeynayaa, qiimeynayaa, oo falanqeynayaa aragtida hada, cilmi-baadhista iyo siyaasada maareeynta shaqaalaha.



## Maareeynta Maaliyada

### HEERKA 1-AAD

a. Wuxuu gudanayaa xisaabinta asaasiga ah ee xisaabta wuxuuna sameynaya dhaqdhaqaaqyada lacagta ee asaasiga ah.
b. Wuxuu raacayaa nidaamyada bookkeeping-ka.

### HEERKA 2-AAD

a. Wuxuu isticmaalayaa xeerarka ganacsiga ee guud ahaan la aqbalo.
b. Wuxuu ku shaqeynayaa miisaaniyada macquula.

### HEERKA 3-AAD

a. Wuxuu caawinayaa qorsheynta miisaaniyada.
b. Wuxuu fulinayaa oo ilaalinayaa agabka alaabaha, qalabka iyo alaabta.

### HEERKA 4-AAD

a. Wuxuu qorsheynayaa, ka warbixinayaa oo ilaalinayaa miisaaniyada.
b. Wuxuu diyaarinayaa qaab-dhismeedka lacagta.

### HEERKA 5-AAD

a. Wuxuu diyaarinayaa oo hirgalinayaa qorshaha ganacsi ee sanadka.
b. Wuxuu waafajinayaa kharashaadka aragtiyaha barnaamijka.
c. Wuxuu diyaarinayaa qorshaha suuq-geynta.
d. Wuxuu raadinayaa fursado maalgalin dheeriya.
e. Wuxuu qorayaa codsiyada maalgashiga.
f. Wuxuu sharxayaa, isticmaalayaa, falanqeynayaa, oo qiimeynayaa aragtida hada, cilmi-baadhista iyo siyaasada maareeynta maaliyada.

# VIII HORUMARINTA XIRFADA IYO HOGAAMINTA

## Muujinta Dhaqamada Xirfadle

### HEERKA 1-AAD

a. Wuxuu fahmayaa in hab-dhaqanada iyo ficilada shaqaalaha ee goobta shaqadu ka turjumayaan goobta.
b. Wuxuu jeclaysanayaa la shaqeynta caruurta iyo abuurida fikir haboon.
c. Wuxuu soo bandhigayaa nadaafad iyo muuqaal shakhsi wanaagsan.
d. Wuxuu muujinayaa caadooyin shaqo wanaagsan.
e. Wuxuu taageerayaa oo u hogaansamayaa qawaniinta iyo nidaamyada liisanka.
f. Wuxuu qiimeynayaa fikrika waxbarista iyo waxbarashada, isagoo isticmaalaya isdhexgalka shaqaalaha, tababar/waxbarasho, iyo jaraa'ido.
g. Wuxuu tilmaamayaa wacyigalinta xeerka anshaxa xirfada ee daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada iyo mawduucyadiisa ugu muhiimsan.
h. Wuxuu muujinayaa dadaalka hadafyada barnaamijka.

### HEERKA 2-AAD

a. Wuxuu maamulayaa dalabyada dadaalada shakhsiga iyo aqoonta.
b. Wuxuu isticmaalayaa xirfadaha xalinta dhibta ee goobta.
c. Wuxuu kula macaamilaa qab ka turjumaya qiyamka iyo ixtiraamka dadka kale.
d. Wuxuu waajibka iyo sidoo kale xubnaha kooxda.
e. Wuxuu fahmayaa tayada adeeg-yada daryeelka cunuga.
f. Wuxuu tilmaamayaa dadaalka xeerka anshaxa.

### HEERKA 3-AAD

a. Wuxuu si joogto ah ugu hawlanaanayaa xeerarka waxbarasho iyo hab-dhaqanka caruurta.
b. Wuxuu muujinayaa isbadelada hada ee early childhood education (waxbarashada barbaarinta caruurta), gaar ahaan caruurta yar-yar-raadqaadka early childhood education (waxbarashada barbaarinta caruurta).*
c. Wuxuu sharxayaa xeerka anshaxa xirfada.
d. Wuxuu aqoonsanayaa xeerarka anshax darada.
e. Wuxuu ka qeyb galayaa go'aan qaadashada barnaamijka.
f. Wuxuu sameynayaa go'aamada barnaamijka ee ku saleysan heerarka xirfada.
g. Wuxuu ilaalinayaa xuduudaha xidhiidhka shaqaalaha iyo qoysaska.
h. Wuxuu kor u qaadayaa tayada adeeg-yada daryeelka cunuga.

### HEERKA 4-AAD

a. Wuxuu ka qeyb galayaa xalinta dhibaatooyinka anshaxa xulasho.
b. Wuxuu sharxayaa aragida shakhsiyadeed ee early childhood education (waxbarashada barbaarinta caruurta) ee ku saleysan aqoonta horumarinta cunuga iyo xeerarka wanaagsan.
c. Wuxuu sharxayaa oo isticmaalayaa xeerka anshaxa xirfada ee sameynta go'aamada xirfada.
d. Wuxuu aqoonsanayaa sababaha iyo astaamaha "tabcaanka" wuxuuna diyaarinayaa istaraatiijayadaha lagaga hortagaayo.
e. Wuxuu qiimeynayaa isbadelada hada ee early childhood education (waxbarashada barbaarinta caruurta) wuxuuna dibu eegayaa xeerarka markay haboon yihiin.

### HEERKA 5-AAD

a. Wuxuu bilaabayaa oo dhexdhexaadinayaa kooxaha xalinta dhibaatooyinka anshaxa xulasho.
b. Wuxuu cusbooneysiinayaa taariikhda cilmi-baadhista iyo siyaasada la xidhiidha daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada.
c. Wuxuu kor u qaadayaa xeerka barnaamijka isagoo la shaqeynaya shaqaalaha kale si loo fahmo loona taageero hirgalinta cilmi-baadhista iyo xeerarka ugu wanaagsan ee caruurta, qoysaska, iyo shaqaalaha.
d. Wuxuu taageerayaa caruurta iyo qoysaska.
e. Wuxuu sharxayaa xidhiidhka ka dhaxeeya aragtida iyo dhaqanka.

## Kobaca Xirfad ee Soconaya

### HEERKA 1-AAD

a. Wuxuu raadinayaa aqoonta lagu horumarinaayo dhaqanka.
b. Wuxuu u tilmaamayaa wacyigalinta horumarinta xirfadaha si joogto ah adeeg-bixiyayaasha daryeelka barbaarinta iyo macalimiinta.
c. Wuxuu ilaalinayaa u hogaansanaanta socota ee shuruudaha waxbarasho.

### HEERKA 2-AAD

a. Wuxuu fiirinayaa oo ka warhayaa khayraadka xirfadeed.
b. Wuxuu ka faa'idaysanayaa fursadaha lagu horumarinaayo awoodaha, labadaba korniinka shakhsiga iyo xirfada, iyo faa'idada caruurta iyo qoysaska.
c. Wuxuu aqbalayaa oo si haboon u saxayaa si loo horumariyo dhaqanka.
d. Wuxuu ka qeybgalayaa ururada xirfadeed.
e. Wuxuu raacayaa xeerarka ansixinta-ku-biirista.
f. Wuxuu qiimeynayaa waxqabadka wuxuuna dajinayaa hadafyada si loo horumariyo aqoonta.

### HEERKA 3-AAD

a. Wuxuu isticmaalayaa khayraadka xirfadeed si loo horumariyo dhaqanka.
b. Wuxuu raadinayaa xidhiidhada aqooneed si kor loogu qaado horumarka xirfadeed (tusaalem qabashada tababare).
c. Wuxuu diyaarinayaa oo fulinayaa professional development plan (qorshaha horumarinta xirfada).
d. Wuxuu ka shaqeynayaa shuruudaha, shahaadooyinka iyo/ama ansixinta barnaamijka.

### HEERKA 4-AAD

a. Wuxuu sharxayaa nidaamka qiyamka xirfadeed wuxuuna hirgalinayaa isqiimeynta xirfadeed.
b. Wuxuu si fiffircoon uga qeybgalayaa horumarinta aqoonta.
c. Wuxuu ku darayaa aqoonta taariikheed, aragti, cilmi-nafsi, iyo seeska bulsho ee waxbarashada qorsheynta iyo go'aan qaadashada.
d. Wuxuu u adeegayaa tababare ahaan ama bixiye taageero farsamo.
e. Wuxuu dhisayaa awoodaha shakhsiga wuxuuna aqoonsanayaa qeybaha horumarku uu ka dhici karo una baahan yahay inuu ka dhaco

### HEERKA 5-AAD

a. Wuxuu sahaminayaa nidaamyada horumarinta xirfadeed wuxuuna qiimeynayaa/fiirinayaa fursadaha kor loogu qaadayo horumarka xirfada dadka kale.
b. Wuxuu nashqadeynayaa fursadaha horumarinta shaqaalaha ee dadka wada-shaqeeya.
c. Wuxuu ka qeybgalayaa shirarka deegaanka, gobolka, iyo qaranka iyo xafladaha lagu faafinaayo aqoonta laguna dejinaayo xidhiidhada aqoonta dibada.
d. Wuxuu aqoonsanayaa isbadelka nidaamka wuxuuna diyaarinayaa xeerarka lagu taageeraayo horumarka xirfadeed.
e. Wuxuu aqoonsanayaa kala duwanaanshaha nidaamyada waxbarasho ee dadka waaweyn iyo barbaarinta caruurta oo wuxuu isticmaalayaa aqoon si loogu dhaqmo.

## Hogaaminta iyo Olaleynta

### HEERKA 1-AAD

a. Wuxuu aqoonsanayaa hab-dhaqanka xirfadeed.

### HEERKA 2-AAD

a. Wuxuu tilmaamayaa taageerada daryeelka liisanka haysta.
b. Wuxuu nidaaminyaa hab-dhaqanka xirfadeed.

### HEERKA 3-AAD

a. Wuxuu ka wacyigalinayaa hab-dhaqano gaara iyo noocyada wadaxidhiidhka dhaqamada aan caamka ahayn ku keeni karaan fasiraad qaldan iyo isfaham daro.
b. Wuxuu aqoonsanayaa baahiyaha bulshada ee saameynaya caruurta, gaar ahaan caruurta yar-yar iyo raadqaadka.*
c. Wuxuu muujinayaa aqoonta arimaha ololeynta.
d. Wuxuu bilaabayaa xalinta dhibka iyo khilaafka barnaamijka iyo shaqaalaha.

### HEERKA 4-AAD

a. Wuxuu difaacayaa qoysaska, maamulka iyo shaqaalaha.
b. Wuxuu sharxayaa nidaamka sharci, oo ay ku jiraan arimaha sharci iyo ololeynta saameynaya caruurta iyo qoysaskooda, wuxuuna u gudbinayaa maclumaadkan dadka kale.
c. Wuxuu sharxayaa sida siyaasadaha dawladu u saameeyaan waxbarashada barbaarinta caruurta iyo waxbarashada.
d. Wuxuu tilmaamayaa aqoonta isbadelka dhismaha kooxda wuxuuna awood u leeyahay inuu bilaabo istaraatiijayadaha xalinta dhibka iyo khilaafka goobta iyo shaqaalaha.
e. Wuxuu tilmaamayaa dadaalka lagu horumarinaayo waxbarashada ugu sareysa iyo tayada shakhsiyaadka leh baahiyo waxbarasho oo dheeriya.
f. Wuxuu la wadaagayaa xuquuqalaha iyo masuuliyadaha caruurta, waalidiinta/qoysaska, daryeel-bixiyayaasha/macalimiinta, iyo xirfadlayaasha kale madaamoo ay la xidhiidhaan baahiyaha waxbarasho ee dheeriga ah.
g. Wuxuu u adeegayaa golaha iyo dadaalada xirfadeed.

### HEERKA 5-AAD

a. Wuxuu u shaqeynayaa isagoo ah af-hayeenka bulshada iyo warbaahinta daryeelka barbarinta iyo arimaha waxbarashada.
b. Wuxuu siinayaa dhaqan shaqo oo dhiirigalinaya qorshaha shaqaalaha ee lagu xalinaayo dhibaatooyinka iyo xalinta khilaafka.
c. Wuxuu u qaban karaa xafiiska midowga xirfadlayaasha.

# Eray-bixinta

## Ololeynta

Waalidiinta (ama qoysaska), ururada ama mutadawaciinta ka shaqeeya magaca xuquuqda iyo danaha dadka kale (sida carruurta ama dadka naafada ah). Waalidku waa u doodayaasha ugu wanaagsan ee caruurtooda.

## Caadooyinka Daryeelbixinta

Caadooyinka ay go'aamiyaan baahiyaha jidheed, dareen, iyo waxbarasho ee cunuga.

## Isticmaalka Cunuga

Haysashada qalab ama agabyo yaal meelaha ay carruurtu si fudud u awoodaan inay ku gaadhaan oo ay isticmaalaan maalinta oo dhan.

## Koriinka Garashada

Xirfadaha la bartay ee la xidhiidha fikirka iyo sabaaynta. Koritaankani wuxuu ka dhacayaa laga bilaabo caruurnimada ilaa uu qofwayn noqdo.

## Daryeel bixiye Joogto ah

Daryeel bixiyuhu inta badan wuxuu la joogaa maalintoo dhan cunuga.

## Dhaqanka

Isku ururinta gaarka ah ee dhaqanka, hawlaha, caadooyinka, awoodaha la qiimeeyo, aragtiyaha dunida, iyo taariikhda taasoo ku astaamaysan koox dad ah.

## DEL/DCYF

Department of Early Learning/Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Waxbarashada Barbaarinta/ Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska):

DEL waxay ahayd haayadii hore ee gobolka ee la sameeyay 2006 iyadoo diirada la saarayo waxbarashada barbaarinta. DEL waxay noqotay Department of children, Youth, and Families (Waaxda caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska, DCYF) kadib markii Badhasaab Inslee saxeexay House Bill (Xeerka Guriga) 1661 on Julaay 6, 2017, isagoo abuuray DCYF. DCYF wuxuu kormeeraa adeegyo dhowr ah oo hore looga bixiyo gobolka Department of Social and Health Services (Waaxda Arimaha Bulshada iyo Adeegyada Caafimaad) iyo Department of Early Learning (Waaxda Waxbarashada Barbaarinta).

## Horumarinta

Nidaamka uu cunuga ku korodhsanayo xirfado meelaha sida: koritaanka bulsho/dareen, garasho, hadal/ luuqadeed, iyo jidheed. Nidaamkan waxa kujira labada wanaagsanaanta iyo xirfadah awooda waxqaadista.

## Gaadhista Koritaanada

Erayga qeexaya guulaha xusuusta leh ee koritaanka cunuga. Tusaalayaasha waxa kujira: isrog-roga, guur-guurashada, socodka iyo hadalka.

## Heerarka Koriinka

Nidaamka caadiga ah ee la rajaynayo in laga helo xirfadaha ee caruurta caadi ahaan kora. Tusaalayaasha waxa kujira: guur-guurashada kahor iyo isticmaalka faraha si ay wax ugu cunan kahor inta aanay isticmaalin mulqaacadaha.

## Kaladuwanaanshaha

Waxa lagu qeexaa kala duwanaanshaha iyo/ama kala gadisnaanta noocyada bani'aadamka kuuwaaso ay kujiraan shaqsiyaadka, kooxaha, bulshada, iyo shirkadaha. Tusaalayaasha waxa kujira: da'da, haybta, taariikhda aqooneed, hababka nololeed iyo awoodaha.

## Jilitaanka Ruwaayada

Hawlaha jilitaanka ama hababka iska dhigista.

## Badbaadinta Wadnaha iyo Sambabada (CPR)

Nidaamka gargaarka deg-dega ah ee wadne xanuunka ku lug leh cadaadinta gidaarka laabta oo lagu xidhayo neefsasho macmal ah.

## Barbaarinta Caruurta

Barnaamijyada ama adeegyada loogu talagalay in lagu daboolo baahiyaha korriinka ee caruurta yar-yar ama socod-baradka (dhalashada ilaa 3 sano jir) iyo qoysaskooda.

## Waxbarashada Barbaarinta

Waxbarashada Barbaarinta waxa kujira dhamaan waxbarashada iyo koriinka cunuga laga bilaabo dhalashada ilaa fasalka saddexaad.



## Xirfada Waxbarashada Barbaarinta

Sida loo isticmaalay dhukumeentigan, waxa ku jira daryeel bixiyaasha cunuga ee sharciga leh ee xarumaha ama daryeelka guriga qoyska cunuga, macalimiinta dugsiga barbaarinta, shaqaalaha barnaamijka dugsiga kadib, iyo xarunta barbaarinta iyo agaasimayaasha dugsiga ka dib iyo shaqaalaha, oo ay la socdaan shaqaalaha dugsiga, oo ay ku jiraan macalimiinta xanaanada ilaa fasalka saddexaad, shaqaalaha taageerada qoyska, tababarayaasha akhris-qoraalka, maareeyayaasha adeegga cuntada, iyo maamulayaasha (tusaale maamulayaasha iyo maamule ku-xigeennada).

## Early Childhood Education and Assistance Program (Barnaamijka Waxbarashada Barbaarinta iyo Caawimada Caruurta, ECEAP)

Barnaamij dugsiga barbaarinta dhammaystiran oo ay bixiso gobolka Washington kaasoo taageera koriinka caafimaadka qaba iyo guusha mustaqbalka ee carruurta aan faa'iido darrada lahayn. Bartilmaameedka dadka ECEAP waa carruurta 4-jirka ah ee dakhliga qoyskoodu uu ka hooseeyo 110 boqolkiiba heerka saboolnimada fadaraalka.

## Damqasho

Awooda inuu waajaho dareen lamid ah dareenka uu waajahayo qof kale.

## Qoysaska

Sida lagu isticmaalay dhokumantigan, deg-dega caruurta iyo kordhinta qoysaska.

## Qayb ahaan Dhaq-dhaqaajinta Jidhka

Iyadoo la isticmaalayo gacmaha iyo faraha oo ka wadashaqaynaya hawlaha sida sawirida, qoraalka, jarida, wax cunista ama ciyaarta

## Guud Dhaq-dhaqaaqa Jidhka

Iyadoo loo isticmaalayo muruqyada jidhka dhaq-dhaqaaq hab dheelitiran sida marka la cararayo, la soconayo iyo la ciyaarayo kubad.

## Madaxa Bilowga

Barnaamijyo koritaano dhamaystiran oo u adeega carruurta laga bilaabo dhalashada ilaa da'da 5, haweenka uurka leh, iyo qoysaskooda. Waxay diirada saartaa cunuga oo waxayna leeyihiin hadafka guud ee kordhinta u diyaarsanaanta dugsiga ee carruurta yaryar ee qoysaska dakhligoodu hooseeyo.

## Luuqada Hooyo

Luuqada uu shaqsigu helo marka ugu horaysa noloshiisa oo qayb ka ah haybta kooxda uu ka dhashay. Mararka qaar waxa lagu qeexaa marka u horaysa, luuqada koowaad ama uu u dhashay cunugu.

## Kudarida

Hawlaha caruurta baahiyaha gaarka ah qabtaan inta ugu badan ama guud ahaan wakhtigooda caruurta caadi ahaan koraysa. Kudaridu waxay ku saabsan tahay xuquuqda cunuga si uu uga qaybqaato iyo barnaamijka ama waajibka dugsiga si uu u aqbalo cunuga. Ku darida waxay diiday isticmaalka barnaamijyada gaarka ah ama fasalada si loo kala saaro carruurta naafada ah iyo carruurta aan naafada lahayn iyadoo la aaminsan yahay in:

- Dhamaan caruurta oo dhami ay baran oo ay ka faa'idaysan karaan waxbarashada.
- Dugsiyada iyo barnaamijyadu waa inay la qabsadaan baahiyaha carruurta, halkii ay carruurtu la qabsan lahaayeen baahiyaha barnaamijka ama dugsiga.
- Kala duwanaanshaha shakhsi ahaaneed ee u dhexeeya carruurta ayaa ah isha hodannimada iyo kala duwanaanta.

## Qorshaha Waxbarashada Shaqsiga ah (IEP)

Qorshe waxbarasho ee qoran oo loogu talagalay cunuga naafada ah ee jooga da'da dugsiga oo ay diyaariyeen koox xirfadlayaal ah (macalimiin, dhakhaatiir, iwm) iyo waalidka cunuga. IEPs waxay ku salaysan yihiin qiimaynta anshax marinta badan ee cunuga waxayna sharaxaan sida cunugu hadda yahay, waxa cunugu u baahan yahay waxbarashadiisa, iyo adeegyada uu cunug u baahan doono. Waxay dib u eegaan oo ay u cusboonaysiiyaan si sanadle ah. IEPs waxa u baahan fadaraalka Individuals with Disabilities Education Act (Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah, IDEA).

## Individualized Family Service Plan (Qorshaha Waxbarashada Shaqsiga ah, IFSP)

Dhukumeenti hagaya habka barbaarinta ee carruurta naafada ah iyo qoysaskooda. IFSP waa habka loo hirgeliyo barbaarinta caruurta ee waxtarka leh si waafaqsan Qeybta C ee sharciga Individuals with Disabilities Education Act (Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah, IDEA). Waxay ka kooban tahay macluumaadka ku saabsan adeegyada lagama maarmaanka ah si loo fududeeyo korriinka cunuga iyo kor loogu qaado awoodda qoyska si loo fududeeyo korriinka cunuga. Iyadoo loo marayo nidaamka IFSP, xubnaha qoyska iyo bixiyeyaasha adeegga waxay u shaqeeyaan koox ahaan si ay u qorsheeyaan, u hirgeliyaan, oo ay u qiimeeyaan adeegyada ku habboon tabashooyinka gaarka ah, mudnaanta, iyo ilaha qoyska.

## Cunug yar

Cunug dhashay ilaa 12 bilood jira.

## Hogaan Cunuga/Calaamadaha Cunuga

Indho-indhaynta dabeecada cunuga iyo sidaasi uga jawaabida.

## Barbaarinta

Barnaamijyada, taageerooyinka ama adeegyada (tusaale, adeegyada taageerada dhibaatooyinka, barnaamijyada barbaarinta caruurta, barnaamijyada waxbarashada barbaarinta) ee loogu talagalay in lagu daboolo baahiyaha gaarka ah ee carruurta iyo qoysaska.

## Luuqada

Nidaamka fikradaha wadaxidhiidh iyo dareenada iyadoo la isticmaalayo dhawaaqyo, tilmaamo, calaamado ama diilimo.

## Nidaamyada Waxbarasho

Nidaamka shaqsigu ulaqabsado deegaanka waxbarashadiisa/waxbarashadeeda.

## Aqoonta

Awooda shaqsigu wax ku akhriyi karo, ku qori karo, ku xidhiidhi karo ama ku fahmi karo.

## Warbixiyaha Loo Igmaday

Warbixiyaasha loo igmaday waa shakhsiyaad, marka ay ku jiraan shaqada caadiga ah ee shaqadooda iyo sababtoo ah waxay xidhiidh joogto ah la leeyihiin carruurta, looga baahan yahay inay soo sheegaan (ama ay keenaan warbixin la sameeyo) mar kasta oo uu dhaco xad gudub jidheed, galmo, ama nooc kale oo xadgudub ah lagu arko ama la sameeyo. laga shakisan yahay, ama marka ay jirto caddayn dayacaad, dhacdo aqooneed, ama dhaawac halis ah oo dhawaan dhacay.

## Mental Health (Caafimaadka Maskaxda)

Sida uu qofku u fikiro, u dareemo una dhaqmo marka ay la kulmaan xaaladaha nolosha. Waxa kujira sida loo waajaho iskubuuqa, la xidhiidhka dadka kale iyo samaynta go'aamada.

## Hage

Shaqsi kula wadaaga khibrad, aqoon iyo xikmad ku saabsan aqoon gaar ah.

## Xirfadaha Isticmaalka Dhaq-dhaqaaqa Jidhka

Awooda shaqsiga uu u isticmaalo kooxaha muruqyada waawayn ama yar-yar. Isticmaalka dhaq-dhaqaaqa jidhka waxa lagu qeexaa isticmaalka muruqyada waawayn ee hawlaha sida orodka ama bootinta. Isticmaala dhaq-dhaqaaqa jidhka ee hawlaha yar-yar waxa lagu qeexaa wadashaqaynta muruqyada yar-yar ee looga baahanyahay shayada sida qoraalka ama xidhashada baldhamada shaadhka.

## Deegaan Akhris

Deegaan kaasoo akhriska iyo qoraalka loo isticmaalo si aad u kala duwan oo dhab ah, ujeedada maalin kasta.

## Horumarinta Xirfada

Waxa lagu qeexaa xirfadaha iyo aqoonta laga gaadhay labadaba horumarinta shakhsi ahaaneed iyo horumarinta xirfada. Horumarinta xirfada waxa ku jira dhamaan noocyada fursadaha waxbarasho ee la fududeeyay, laga bilaabo shahaado jaamacadeed ilaa kooras shaqo oo rasmi ah, shirar iyo fursado waxbarasho oo aan rasmi ahayn oo loo nidaamiyay hawl ahaan. Waxaa jira habab kala duwan oo loo maro horumarinta xirfadda, oo ay ku jiraan tababarka, hawlaha bulshooyinka, barashada casharka, latalinta, kormeerka dib u eegista iyo caawinta farsamada.

## Bixiyaasha

Sida lagu isticmaalay dhokumantigan, waxa kujira waxbarashada barbaarinta iyo xirfadlyaasha daryeelka caafimaad, iyadoo ay ku xidhan tahay mawduuca.

## Gudbin

Dhinaca barbaarinta caruurta, habka lagu caawinayo qoyska ama daryeel bixiyaasha xanaanada cunugga inay helaan adeeg, oo ay ku jirto ku xidhida cunuga ama haayada hogaanka qoyska ama degmada dugsiga ee adeegyada waxbarashada gaarka ah.

## Jawaabta Daryeel Bixinta Cunuga Yar-Socod baradka ah

Waxaa lagu qeexaa daryeel ilaalinaysa waxa cunug xiiseeyo, siinta khibrada cunuga si uu ula falgalo waxa isaga ama iyada xiisaynayso, balaadhinta isdhexgalka, fahamka in caruurta yar-yar iyo khibradaha waxbarasho ee socod baradka ay yihiin manhajka.

## Baadhitaan

Qiimayn kooban oo loo nashqadeeyay in lagu aqoonsado caruurta kuwaasoo khatar ugu jira dhibaatooyin caafimaad, dhibaatooyin koriimeed, iyo/ama xaalado naafo. Caruurtani waxay u baahan karaan inay helaan adeegyo barbaarin caawimo sida ugu dhakhsaha badan uguna macquulsan.

## Dabeecada Isxakamaynta

Awooda uu qofku ku xakamayn karo dareenada iyo dabeecadaha.

## Baahiyaha Gaarka ah

Tani waxa ay tilmaamaysaa baahiyaha carruurta ee dib u dhaca bulsheed, shucuureed, isgaarsiin, garaad, ama dib u dhac jidheed ama naafo ah. Kalmada gaar ah waxa lagasoo amaahday qaybta waxbarashada gaarka ah. Eray bixintan laguma khalkhali doono baahiyaha dhaqan.

## Istaraatijiyado

Hawlaha waxbarasho oo la soo jeediyay oo ay isticmaali karaan daryeel bixiyeyaasha guriga ama daryeelka barbaarinta iyo waxbarashada hore si ay u caawiyaan carruurta horumarinta tilmaamayaasha iyo yoolalka la doonayo.



# Tixraacyada


Batshaw, M., iyo Perret, Y., (1992). Caruurta Naafada ah: Agab Caafimaad. Daabacaada Saddexaad. Shirkada Daabacaada Paul H. Brookes. Baltimore, Maryland.

Bredekamp, S., and Copple, C,. (2009). Hawsha Kuhaboonaanta Koriinka ee Barnaamijyada Barbaarinta Caruurta ee u Adeegaya Caruurta laga Bilaabo Dhalashada ilaa Da'da 8. National Association for the Education of Young Children (Ururka Heer Qaran ee Waxbarashada Caruurta Da'ada Yar). Washington, DC.

Clifford, R., Cryer, D., iyo Harms, T. (2005). Cabirka Heerka Deegaanka Barbaarinta: Daabacaada Dib Loo Eegay. Macalimiinta Kuliyada Warbaahinta, Jaamacada Columbia, NY

Clifford, R., Cryer, D., iyo Harms, T. (2006). Cabirka Heerka Deegaanka Cunuga/Socod baradka: Daabacaada Dib Loo Eegay. Macalimiinta Kuliyada Warbaahinta, Jaamacada Columbia, NY

Heerarka Tayada Asaasiga ah ee Barnaamijyada Waxbarashada Barbaarinta: Cutubka 110-300 WAC. **https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300&full=true#110-300**

Gopnik, A., Kuhl, P., iyo Meltzoff, A. (1999). Aqoonyahanada Xigashada: Waxa Waxbarashada Barbaarintu ay Inoo Sheegayso. Harper Perennial, New York, NY.

Hawley, T., iyo Gunner, M. (2000). Bilaabista Caqliyaysan: Sida Khibrada Barbaarintu u Saamayso Koriinka Maskaxda. Kahortaga Wax aad u Yar.

Lacagta iyo EBER ILAA SADDEX. Dib loo celiyay Feebarwari 2010 **www.ounceofprevention.org/news/pdfs/Starting_Smart.pdf**

Kansas-Missouri. (2001). Awoodaha Muhiimka ah ee Daryeelka Barbaarinta iyo Waxbarashad Xirfadlayaasha Kansas iyo Missouri. Dib loo Celiyay

Diiseembar 2009 **www.srskansas.org/KEESM/Appendix/C-8_Core_CompetenciesB&W.pdf**

Lerner, C., iyo Parlakian, R., (2000) Caruurta Aayar Iskulayliya: Waxa Ay La Macno Tahay iyo Waxa Lasamaynayo. EBER ILAA SADDEX: Xarunta Qaranka ee Caruurta yar-yar, Socod baradka iyo Qoysaska. Dib loo celiyay Feebarwari 2010 **www.zerotothree.org/site/PageServer?pagename=ter_key_challbehav_slowwarmup&AddInterest=1503**

Mangione, P. (1995) Daryeel bixinta Cunuga yar/Socod baradka: Tilmaamta Koriinka Garashada iyo Waxbarashada. Waaxda Waxbarashada ee California.
Sacramento, CA.

March of Dimes. (2003) Fahamka Dabeecada Kalmada Cunug yar: Dabeecada Cunuga, Talaabooyinka iyo Calaamadaha. Dib loo celiyey Febraayo

2010 **www.marchofdimes.com/nursing/modnemedia/othermedia/infantBehavior.pdf**

National Association for the Education of Young Children (Ururka Heer Qaran ee Waxbarashada Caruurta Yaryar). (2003). Diyaarinta Xirfadlayaasha Barbaarinta Caruurta. National Association for the Education of Young Children (Ururka Heer Qaran ee Waxbarashada Caruurta Yaryar) Washington, DC.

Xafiiska Madaxa Bilawga, Administration for Children and Families (Maamulka Caruurta iyo Qoysaska), U.S. Department of Health and Human Services (Waaxda Caafimaadka ee Maraykanka) iyo Adeegyada Bani'aadamka. SOLAR. Adkaynta Hawlaha Waxbarasho iyo Natiijooyinka: Borofaaylka Xirfada Shaqaalaha Fasalka Barbaarinta.

Waaxda Xidhiidhka Dadwaynaha ee Wisconsin. (2008). Nidaamyada Heerarka Waxbarashada Barbaarinta ee Wisconsin: Daabacaada Labaad. Xarunta Macluumaadka Daryeelka Cunuga ee Wisconsin. Madison, WI.

Waxbarashada Barbaarinta iyo Halbeegyada Koriinta ee Gobolka Washington. Hagaha Waxbarashada iyo Koriinka Caruurta Yar-yar: Laga Bilaabo Galitaanka Dugsiga Barbaarinta. (2005). Gobolka Washington.


***Tixraacyada qaarkood ayaa laga yaabaa in dib loo eego ama aan la helin Sebtembar 2022.***



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

**www.dcyf.wa.gov**

*DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed.*

*Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhada Qaybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylkal **communications@dcyf.wa.gov**.*

DCYF PUBLICATION EPS_0023 SM (09-2022) Somali